

## Cusboonaysiin la xidhiidha COVID-19 taas oo saameynaysa bulshooyinka muhaajiriinta iyo qaxootiga.

Qof kasta oo xanuunsanaya inta lagu jirro dhibaataadda COVID-19 waa inuu raadsado daryeel caafimaad cabsi la'aan, iyada oo aan loo eegayn aqoonsiga muhaajiriinta ama awooda ay ku bixinayaan adeegyadda caafimaadka. Waa u muhiim in qof kasta oo jooga Saint Paul oo aay ku jiraan deganayaasha aan muwaadiniinta ahayn iyada oo aan loo eegayn aqoonsiga muhaajiriinta helaya daryeel aay tahay inay xanuunsadaan.

Isbeddelada dhawaan la sameeyay “Sharciga Xukunka Dadweynaha” taas oo ku adkaynaysa qaar ka mid ah muhaajiriinta inay helaan kaadhka cagaaran ama fiisaha marka aay helaan qaar ka mid ah dheefaha dawladda iyo ICE waxay korodhisay waxqabadada fulinta dad weynaha gudaha taas oo ka shaqeysay niyad jabka tegitaanka muhaajiriinta iyo qaxootiga isbitaalada iyo qalabka daryeelka caafimaadka si aay u helaan daaweyn caafimaad.

**Si kasta oo aay tahay, waa u muhiim bulshadeena muhaajiriinta ah iyo qaxootiga ee Saint Paul inay oggaadan:**

1. **Dacwad dadweyne** The United States Citizenship and Immigration Service (USCIS) **ma tixgellin doonto wax “baadhid, daaweyn, ama daryeel kahortagg ah (aay ku jiraan tallaalo, haddii tallaalku sababo helitaan) oo la xidhiidha COVID-19 go’aanka dacwadda dadweynaha,** xitaa haddii daaweyntan la bixiyo ama iibsado mid ka mid ah ama ka badan dheefaha dadweyne ahaan” Eeg: [USCIS ku dhawaaqday](#).
2. **Fulinta ICE:** Markay ahayd March 18<sup>th</sup>, [ICE waxay ku dhawaaqday inay “si kumeel gaadh ah u habbeyn doonto mawqifka hirgellinteeda” iyo xoog saaridda “khataraha nabag gelyadda dadweynaha iyo shakhsiyaadka ku xidhan xabsi qasab ah oo ku salaysan sababo dambi. “kuwa kale oo dhan, wakaaladu “waxay ku dedaali doonta si taxadir leh dib u dhigida ficillada fulinta illaa inta ka dambaysa dhibaataada ama u adeegsanayso beddello kale xabsi gaaban ah, sida ugu saxsan. “ICE sido kale waxay xustay “joogtaynta siyaasadda meelaha xaasaasiga ah, inta lagu jirro xiisadda COVID-19, Ma sameyn doonto wax xidhitaano ah meelaha u dhaw isbitaalada, xafiisyadda dhakhaatiirta, ama rugaha caafimaadka “marka laga reebo xaaladaha aan caadiga ahayn.”](#)

### Cusboonaysiimaha kale la xidhiidha muhaajiriinta kale/COVID-19

3. **ICE** waxay joojisay dhammaan baadhitaanadii qofeed ee Saint Paul Filed Office iyada oo dadka telefoon ahaan lagu hubinayo—ficilka keliya qofeed ee Xafiiska ICE Saint Paul waa lacag bixinta deebaajigga. Macluumaad inta ka badan la xidhiidh Xafiiska Saint Paul halkan: Telefoon; (612) 843-8600.
4. **Maxkamadaha muhaajiriinta:** Marka loo eego [websaydka EOIR](#), **dhammaan dhegaysiyadda muhaajiriinta aan dib loo dhigin dib** ayaa loo **dhigi doonna**, taas oo keenaysa xidhitaanka kow iyo toban maxkamadood (Seattle, Atlanta [Peachtree], Charlotte, Houston [Gessner], Louisville, Memphis, NYC [Federal Plaza & Broadway], Newark, Sacramento, Los Angeles [Olive]). Maxkamadaha muhaajiriinta kale ee aay ku jiraan Bloomington, Minnesota waxa aay usii furnaanayaan **keliya kiisaska la xareeyay.**

5. **Xidhitaanka xafiisyadda USCIS** : Laga bilaabo March 18, adeegyadda muhaajiriinta iyo muwaadinnimada maraykanku wuxu si ku meel gaadh ah u joojiyay adeeyadda shakhsiyeed ee goobta xafiiska, xafiisyadda magan gelyadda, iyo Xarumaha Taageerada Codsiga si aay u caawiso hoos u dhigidda fiddida cudurka Coronavirus 2019 (COVID-19). Xafiisyadda USCIS waxa dib loo furi doonna markay tahay 07 April haddaan xidhitaanka dad weynaha aan lasii fidin. Si kasta ha ahaate, USCIS waxay bixin doonta adeegyo deg deg ah xaaladaha xaddidan. Si aad u jadwalayso ballan deg deg ah, la xidhiidh [Xarunta Xidhiidhka USCIS](#).
6. **Meel ku haynta muhaajiriinta:** ICE waxay si ku meel gaadh ah u joojisay booqashooyinka sharci darada ah dhammaan xarumaha lagu hayo muhaajiriinta. Booqashooyinka sharciga ah weli waa la oggolyahay.
7. **Joojinta ku meel gaadhka ah ee dib u dejinta qaxootiga:** Af-hayeen u hadlay Waaxda Gobolka dhawaan ayaa xaqiijiyay in codsiyadda qaxootiga maraykanka la joojin doono laga bilaabo Khamiista, 19-ka March illaa Isniinta, 6-da April. Arbaca, 18-ka March waxay ahayd maalintii ugu dambaysay imaanshaha qaxootiga..
8. **Xayiraadda Safarka** – Markay ahayd March 13, 2020, madaxweynaha ayaa balaadhiyay xayiraada safarka oo aay markii hore ku jireen China iyo si loogu darro 26-ka dal ee ka socda aagga Schengen: Austria, Belgium, Czech Republic, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Iceland, Italy, Latvia, Liechtenstein, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Norway, Poland, Portugal, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden, ad Switzerland. Xayiraadda safarka soo gelitaanka Maraykanka ee dhammaan socotada oo aay la socdaan reebitaano gaar ah kuwaas oo joogay China, Iran ama aagga Schengen intii lagu jirray muddadii 14-ka maalmood ee ka horaysay soo gelitaankooda ama isku daygooda soo gelitaan ee maraykanka. Eeg [Baaqa madaxweynaha faah faahin inta ka badan](#)
9. **Cusboonaysiimahani waxay ku qasbanyihiin isbeddelo dhawr ah. Fadlan dib usoo booqo Shabakada boggan sidoo kale websaydka Dawladda Dhexe ee ku xusan sare macluumaadka la cusboonaysiiyay.**